

Suurat At-Takaathur

سُورَةُ التَّكْوِيْنِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa idin shuqliyay Dadow wax badsasho (iyo isu faanid),

أَلْهَكُمُ التَّكَاثُرُ ﴿١﴾

2. Intaad Xabaalaha ka tagtaan (dhi-mataan).

حَتَّىٰ زُرْتُمُ الْمَقَابِرَ ﴿٢﴾

3. Saas ma aha ee waad ogaan-doontaan.

كَلَّا سَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٣﴾

4. Haddana saas ma ehee waad ogaan-doontaan (Faanka cidhibtiisa).

ثُمَّ كَلَّا سَوْفَ تَعْلَمُونَ ﴿٤﴾

5. Haddaad dhab ahaan wax u ogtihiin (waad dayn lahaydeen xumaanta).

كَلَّا لَوْ تَعْلَمُونَ عِلْمَ الْيَقِينِ ﴿٥﴾

6. Dhab ahaan baad u arkaysaan (Naarta) Jaxiima,

لَتَرَوُنَّ الْجَحِيمَ ﴿٦﴾

7. Ka dibna waxaad u arkaysaan Naartaas si yaqiin ah.

ثُمَّ لَتَرَوُنَّهَا عَيْنَ الْيَقِينِ ﴿٧﴾

8. Waxaana laydin warsan Maa-lintaas Nicmadii.

ثُمَّ لَتُنشَلْنَ بِوَمِيدٍ عَنِ النَّعِيمِ ﴿٨﴾

Faan iyo isla wayni wax qiima ah ma leh, waxaana lagala kulmaa cidhibxumo iyo khasaare, marse hadii la dhiman dhab-ahaanna wax loo arki doono, Nicmadii Addunyana lays waydiindoono waa in wanaag la hormarsadaa, Xoolo iyo Dad isugu faanna laga tagaa, Xooluhu maxay tari haddaan wanaag loo hormarsanin.

Rasuulkii Eebana wuxuu yidhi «naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee»: Maydka waxaa raaca saddex, laba way soonoqon midna wuu la jiraa: Waxaa raaci Ehelkiisa, maalkiisa iyo camalkiisa, waxaa soo noqon Ehelkiisii iyo maalkiisii, waxaana ku hadhi camalkiisii. Waxaa wariyay Bukhaari, Muslim iyo Tirmidi. At-Takaathur (1-8).

Suurat Al-Caşr

سُورَةُ الْعَصْرِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Eebe wuxuu ku dhaartay Waqtiga Casarka ah.
2. In Dadku khasaaro ku suganyahay.
3. Marka laga reebo kuwa rumeeyay xaqa ee Camal fiican fala, isuna dardaarma xaqa, isuna dardaarma Samirka.

Suuraddani waa Suurad gaaban, haseyeeshee aad u wayn, waxayna caddaysay in Dadku khasaaray wixii ka soo hadhay kuwa xaqa rumeeyay camal wanaagsanna la yimid.wanaaggana is faray.Samirkana isu dardaarmay.

Dhabaraani wuxuu ka wariyay Cubaydullaahi Binu Xafse inuu yidhi: Laba ruux oo asxaabtii rasuulka ka mid ah waxay ahaayeen hadday kulmaan inayn kala tagin isagoon midkood akhriyin suuraddan ilaa dhammadkeeda markaasay isa salaami jireen.

Imaamu Shaaficina wuxuu Yidhi Eeba ha ka raalii noqdee: Dadku Hadday Suuraddan Fiiriyaan way u waasac noqon lahayd (ku fillaan lahayd). Al-Caṣr (1-3).

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

وَالْعَصْرِ

إِنَّا الْإِنْسَانَ لَقَفِي خُسْرٍ

إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَتَوَّصُوا

بِالْحَقِّ وَتَوَّصُوا بِالصَّبْرِ

Suurat Al-Humazah

سُورَةُ الْهُمَزَةِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Halaag Wuxuu u Sugnaaday xanle wax ceebeeya oo Dhan,
2. Oo Xoolaha kulmiya (xaqana ku bixinin).
3. Ma wuxuu u malayn in xoolihiisu waarin.
4. Saas ma aha ee waxaa lagu tuuri (Naarta) Xudhama.
5. Ma taqaannaa Xudhama.
6. Waa Naarta Eebe ee la huriyay.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

وَبِئْسَ لِكُلِّ هُمْزَةٍ لَعْنَةٌ

الَّذِي جَمَعَ مَا لَا وَعَدَّدَهُ.

يَحْسَبُ أَنَّ مَالَهُ أَخْلَدَهُ.

كَلَّا لَيُنْبَذَنَّ فِي الْحُطَمَةِ

وَمَا أَدْرَاكَ مَا الْحُطَمَةُ

نَارُ اللَّهِ الْمَوْجِدَةُ